# WAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGAATO

**Seattle Third Party Billing (Sharciga Qarash Bixinta Qolada Saddexaad) ayaa qeexaaya xeerarka mulkiilayaasha dhulka, si iskood ah ama ayagoo adeegsanaaya shirkado gaar loo leeyahay, ay ka qaadaan kiraystayaasha qarashka alaabta guriga oo ka baxsan qarashka kirada. Sharcigaan wuxuu dhaqan galay Feebaraayo 1, 2004.**

Sharcigu wuxuu qabanayaa:

- Dhismayaasha la dagan yahay (abaarmatiyaasha, guryaha, jardiinooyinka la dhigto aqallada guur-guura ama ama meelaha lagu baakimo doonta) ee ku yaalla Seattle oo leh saddex qol ama ka badan oo kiro ah;
- Deegaannada kor lagu qeexay ee adeegsada adeegga qalabka guriga ee cabirka casriga ah ama ama adeegga qalabka guriga ee aan cabirka lahayn kaasoo loo sameeyay dhismaha ama tiro dhismayaal ah si guud;
- Adeegyada biyaha magaalada, bulaacada, qashinka iyo korontada.

---

**Waa maxay biilka qarashka qoloda saddexaad ee adeegga qalabka guriga?**

Biilka qolada saddexaad wuxuu yimaadaa marka dhisme la dagan yahay oo ku yaalla Magaalada Seattle uu helo adeegyo mulkiilaha guriguna si gaar ah u gudbiyo biilka adeegyadaan qayb kasta oo guriga kiro looga dagan yahay. Mulkiilaha dhulka, ama shirkada biil aruurinta ee asaga wakiilka ka ah, taasoo doonaysa inay ka qaado kiraystayaasha qarashka adeegyada biyaha, bulaacada, qashinka iyo korontada, waxaa qasab ku ah inay raacdo sharcigaan.

**Sidee biilka qolada saddexaad u shaqeeyaa?**

Marka koobaad, mulkiilaha guriga ayaa loo dirayaa cadaynta qarashka adeegga guriga ee dhismaha leh cabirka casriga ah, ama adeegyada kale ee aan la cabirin oo la siiyo dhismaha, sida adeegga qashinka ama bulaacada. Mulkiilaha dhulka ayaa markaas u qaybinaaya qarashka saamiga uu kirayste kasta ka isticmaalay qarashka adeegga guriga. Ugu danbayntii, kiraystayaasha ayaa ka helaaya dalabka biilka mulkiilaha guriga ama shirkada qarash aruurinta, kamana heli doonaan Magaallada Seattle. Qarashka laga dalbado kiraystayaasha gabi ahaanba kuma xirna isticmaalka kirayste kasta.

**Maxaa ku jira qarashka laga dalbanaayo kiraystaha?**

- Magaca, ciwaanka ganacsiga iyo nambarka taleefanka mulkiilaha guriga ama shirada saddexaad ee wakiilka ka ah asaga taasoo dalabka biilka u diraysa kiraystaha.
- Aasaasiyaadka qarash kasta oo gaar ah, ayna ku jiraan qarashaadka adeegga iyo qarashka daahitaanka, haddii uu jiro, oo isla socda, iyo wadarta guud ee biilka.
- Haddii guryaha qayb-qayb loo cabiro, tirsiga cabirkii hore iyo kan hadda, taariikhda tirsiga cabirka hadda, iyo cadadka adeegga la isticmaalay.
- Taariikhda ay tahay in la baxsho, taariikhda la dhaafaayo xiligii biilka la bixin lahaa, cadadka qarash kasta oo ganaaxa soo daahitaanka ah oo la qaadi karo, iyo taariikhda qarashka soo daahitaanka ama ganaaxyada lasoo rogaayo.
- Cadadka lacago kasta oo horay loogu lahaa.
- Magaca, ciwaanka boostada iyo taleefan nambarka cida loo diraayo su'aalaha iyo khilaafaadka dhanka biilka, saacadaha iyo maalmaha ganacsigu furan yahay, iyo habraaca xallinta khilaafka.

**Sidee ayaa loo xisaabiyaa qarashka biilka ku baxa adeegga guriga kiraystaha?**

Mulkiilayaasha dhulku waxay leeyihiin qaabab kala duwan oo ay u qoondeeyaan biilalka guriga. Mulkiilaha guriga ayaa sidoo kale go'aansan kara inuu guriga ku rakibo qalab qayb kasta si gaar ah u cabira. Kiraystayaashu waa inay hubiyaan heshiiskooda kirada ama ogaysiiska qoran ee uu u keenay mulkiilaha gurigu si ay u go'aansadaan sida lagu xisaabsho biilalka adeegyadooda.

**Waa maxay qarashaadka adeegga guriga ee loo gudbiyo kiraystayaasha?**

Wadarta guud ee qarashaadka laga codsanaayo kiraystayaasha dhismaha dagan wama inaysan ka badan cadadka biilka adeegga ee laga rabo dhismaha oo dhan, marka laga reebo qarash kasta oo ganaax dib u dhac ah kaasoo mulkiilaha guriga lagu leeyahay. Qarashaadka soo socda waa la ogolyahay:

* Qarashaadka adeegga ee aan ka badnayn $2 halkii adeeg bishiiba, aana inuusan ka badan isku gaynta qarashka adeegga oo ah $5 bishiiba dhammaan adeegyada guriga.
* Qarashaadka lasoo daahida lacagta oon ka badnayn $5 bishiiba oo ay la socoto lacag dulsaar ah oon ka badnayn 1% bishiiba. Qarashaadka ganaaxa lacagta lala soo daaho waa inaysan kaysamin ilaa ugu yaraan 30 maalmood kadib marka kiraystuhu helo dalabka qarashka.
* Qarashka maaliyada kala dhiman waa inuusan ka badan $31 halkii jeeg oon dhamaystirnaynba.

**Waa maxay xogta iyo diiwaannada ee ay qasabka tahay in la siiyo kiraystayaasha?**

Mulkiilayaasha guryuhu wwa inay soo dhajiyaan, ama gacanta u galiyaan ama boostada ugu diraan kiraystayaasha haddii aan soo dhajintu suuragal ahayn, sharaxaada qoran ee qaabka loo adeegsado in loo qoondeeyo qarashka adeeg kasta oo guriga la siiyo iyo koobiga Seattle Municipal Code (SMC, Xeerka Maamulka magaallada Seattle) Cutubka 7.25. Waxaa intaas sii dheer, mulkiilayaashu waa inay soo dhajiyaan koobiyada sadex kamid ah biilalka adeegga guriga ee ugu danbeeyay waana inuu hayaa diiwaanka biilalka adeegga guriga ee labadii sano ee ugu danbeeyay. Mulkiilayaashu waa inay sameeyaan biilalkii adeegga labadii sano ee ugu danbeeyay ee, iyo, saddexdii biil ee adeegga guriga ee ugu danbeeyay haddii aan boor lagusoo dhajin karin, kuwaasoo ay heli karaan kiraystayasha markay codsadaan, muddo shan (5) maalmod oo kua shaqada ah.

**Mulkiilaha guriga ama wakaalad saddexaad oo biilka aruurisa ma saamayn kartaa warbixinta daynta ee kiraystaha?**

Waa suuragal. Mulkiilaha guriga ayaa xaq u yeelan kara asagoo raacaaya sharciga gobalka ama kan federaalka inuu la xariiro wakaalada soo gudbisa xogta daynta.

**Mulkiilaha guriga ama wakaalad saddexaad oo biilka aruurisa ma sin karaa xogteena shaqsiga ah ee la xariira kiraystaha?**

Mulkiilaha gurigu wuxuu kaliya siin karaa wakaalada saddexaad ee biilka aruurisa magaca iyo ciwaanka guriga kiraystaha mana siin karo wakaalada nambarka social security ama xogta kale ee shaqsiga ah.


# Khilaafka
# Xal gaarista

**Sidee ayay kiraystayaashu oga hor imaan karaan arimaha wakaalada saddexaad ee biilka aruurinaysa?**

Kiraystuhu waa inuu ogaysiiyaa wakaalada biilka aruurisa uuna u sharxaa sababta khilaafka muddo 30 maalmood ah gudahood marka loosoo diro dalabka biilka. Wakaalada biilka qaada waxaa qasab ah inay la xariirto kiraystaha si ay ugala hadasho khilaafka 30 maalmood gudahood marka ogaysiiska khilaafka dhanka biilka lasoo gaarsiiyo. Kiraystayaashu waa inay si niyad wanaag ah usoo gudbiyaan khilaafka biilka, ayna baxshaan cadad kasta oo aysan dood ka qabin. Kiraystayaashu waa inay marka koobaad kala shaqeeyaan wakaalada biil aruurinta sidii loo xalin lahaa khilaafka, laakiin waxay cabasho u gudbin karaa baaraha Seattle Office of the Hearing Examiner (Xafiiska Dhagaysiga Cabashada ee Seattle) (206-684-0521), ama ay aadaan maxkamad hadday muhiim tahay. Haddii aan kiraystuhu gudbin cabasho ama uusan aadin maxkamad 120 maalmood gudahood kadib marka uu ogaysiiyo wakaalada dooda uu qabo, mulkilaha guriga ayaa kiraystaha gayn kara maxkamad ama qaadi kara talaabooyin kale si uu u xaliyo khilaafka ama uga qaato qarashaadka uusan wali bixin.

Wixiixii xog dheeraad ah booqo: https://tenantsunion.org/rights/utility-billing

## Qolada Saddexaad Biilka Adeegga Guriga



**Difaaca Macmiilka Kiraystayaasha**

City of Seattle